



Waalidiinta sharafta leh,

Waxbarashadu waa tan ugu muhiimsan ee ilmahaagu uu u baahan yahay si uu nolol fiican Jarmalka ugu helo. Sidaas darteed waxaan doonaynaa inaan qoraalkan kugu tebino wargelinta ugu muhiimsan ee fursadaha waxbarashada ee gobolkeena Rheinland-Pfalz.

Waxbarashadu waxaa gobolkan Rheinland-Pfalz laga bilaabaa xanaanadaha caruurta – Eray kalu oo aan xanaanada caruurta Jarmalka gudahiisa ugu isticmaalno waa „Kindertagesstätte“. Ilmahaagu waxuu xanaanada caruurta kula ciyaari karaa oo la saaxiibi karaa caruur kale. Taas kasoke waxuu meesha ku baran karaa Af-Jarmalka. Caruurta luqadaha qalaad si fudud bay ku bartaan markay wada cayaarayaan. Sidaas darteed waa fursad weyn, hadii uu ilmahaaga sida ugu degdega badan u tago xanaanada caruurta. Ilmo kasta oo ku nool gobolkan Rheinland-Pfalz waxuu xaq u leeyahay in boos laga siiyo xanaanada caruurta, markii uu ilmaha sanad da’diisu gaarto. Taasi micnaheedu waa hadii aad doonaysid ilmahaagu waxaa hubaal ah in ilmahaaga boos ka helaayo xanaanada caruurta – markii uu ilmaha 2 jirsadana waa kharash laáan.

Waxaad wadahadal tafatiran la yeelanaysaa macalimiinta xanaanada. Teeda kale asbuucyada ugu horeeyo ilmaahaaga waad u raaci kartaa xanaanada, si aad u aragtid inuu ku faraxsan yahay. Anagu Jarmalka waxaa si khaas muhiim inoo ah in waalidiinta iyo macalimiinta is aaminaan oo ay wada shaqeeyaan. Sidaas darteed marwalbo suáalhaaga weydii.

Booqashada xanaanada caruurta waxay saqiirka u tahay talaabada kowaad ee wadankooda cusub. Caruurta waaweyn waxay Jarmalku booqdaan Iskuulka.

Firfircooni cashar qaadasho, waxbarasho wanaagsan iyo shahaado buundo fiican waa shuruudaha Jarmalka shaqo iyo nolol fiican looga helo. Maadaama ay waxbarashadu muhiim tahay, waxaa Jarmalka gudahiisa qasab ah dhigashada iskuulka. Taas micnaheedu waa xitaa gobolkeena Rheinland-Pfalz waa sharci in ilmo kasto inuu iskuulka aado (§56 Sharciga iskuulka).

Ilmahaaga waa inuu Af-Jarmalka barto si uu Iskuulka ugu guulaysto. Siday taas u suurto gasho iskuulada gobolka Rheinland-Pfalz waxay bixiyaan casharo si deg-deg ah Af-Jarmalka loogu barto. Iskuuladan waxaa asbuuc kasto laga bixiyaa 20 saacadood oo Af-Jarmal ah. Af-Jarmalka ka soke ilmahaagu waxuu wax la baranayaa caruur iskuuleey oo Jarmal ah oo ay isku fasal ku noqonayaan maadooyinka aan Afjarmalka si deg-deg ah looga baahnayn. Tani waxay ilmahaaga u suurto galinaysaa inuu asaagiisa xiriir la yeesho asxaabna uu helo. Maadooyinkaas waxaa ka mid ah farshaxan, muusig, isboortiga iyo- hadii ilmahaaga uu af-ingriis yaqaano- Ingiriis.

Iskuul hagaagsan waxuu u baahanyahay aaminaad iyo wada shaqayn waalidiinta, macalimiinta iyo ardayda. Iskuulka waxaa kale ka helaysaa wargelin fursaha waxbarasho ee wadankeena. Wuxaad markasto waydiin kartaa loona baahanyahay inaad macalimiinta ama dirtoorka suáalo waydiisid oo aad la xiriirtid.

Waxaan kuu rajaynaynaa wanaag badan inaad Jarmalka ku qaadatid ilmahaagana inuu farxad badan iyo guul inuu xanaanada caruurta iyo iskuulka ku qaato.



Irene Alt

Wasiirada wada noolaashada,
qoyska, caruurta, dhalinta iyo dumarka



Vera Reiß

Wasiirada waxbarashada,
cilmiga aqoon korosiga iyo dhaqanka